


Saamaynta Biyo-Mareenku Ku Leeyahay Harada Komo

Tayada biyaha ee Harada Komo waxaa si wayn u saameeyay qulqulka biyaha roobka ee ka yimaada biyo-mareenada magaalada. Qarnigi la soo dhaafay, biyo roob oo wasakhaysan ayaa ku qulquli jiray harada iyagoo u siimaraya marinada biyaha roobka, kuwaasoo hoos u dhigay tayada biyaha iyo caafimaadka nidaamka deegaanka. Saamaynta harada ka soo gaarta wasakhawga waxaa ka mid ah sare u kaca aljiga, nadiifnimada biyaha oo hoose u dhaca, dhimashada kalluunka, iyo kala duwanaanta la'aanta noolaha. Sanadihii ugu dambeeyay, tayada biyaha ee Harada Komo waxaa lagu hagaajiyay taageero bulsho oo adag oo joogta ah iyo hawlaha maaraynta istaraatiijiyadeed ee ay hogaaminayaan Capitol Region Watershed District, Magaalada Saint Paul, iyo la-hawlgalayaasha.

Biyaha Roobka ee Socda Waxay Wasakh u Keenaan Harada

Marka roob uu da'o ama barafka uu dhalaalo, biyuhu waxay ka soo qulqulaan guryaha dushooda, iyo meelaha laamiga la saaray waxayna ku qulqulaan marinada biyaha roobka, iyagoo horay u soo qaadayo wasakh una keenaya harada.


Wasakheeyayaasha ugu badan waxaa ka mid ah:



Waa maxay Biyo-Mareen?

Aag dhuleed oo hal meel ku shuba biyaha, sida haro ama webi.


Biyo-mareenka Harada Komo wuxuu ku dhawaad 25 jeer ka wayn yahay harada lafteeda waxaana ka mid ah qaybo ka mid ah Saint Paul, Falcon Heights, iyo Roseville. Biyo-mareenka oo dhan wuxuu biyaha ku shubaa Harada Komo isagoo sii marinaya 22 dhuumo oo qaada biyaha roobka.



Isku xirka Wabiga Mississippi ee Harada Komo

Biyuhu waxay ka baxaan marin ku yaalla gacanka koonfur bari ee harada iyo dhuun 6-mayl ah taasoo biyaha ku shubta Webiga Mississippi ee u dhow magaalada hoose ee Saint Paul.


Maxaad Samayn Kartaa Si Aad u Ilaaliso Harada Komo?



Nadiifi qulqulka biyaha roobka



Badeel badan ku xaaq barafka, cusbo yar isticmaal



Nadiifi qashinka daaradda iyo xayawaanka rabbaayada



Xasili dhulka bannaan



Qashinka ku gur weelal



Samayso beerta qabata biyaha roobka!

Waa Sidee Harada Maanta?

Ogow waxbadan oo ku saabsan tayada biyaha Harada Komo iyo dedaalada lagu hagaajinayo harada capitolregionwd.org/comolakewq